




Si loo dhaqan geliyo Qodobbada 2aad, 3aad iyo 6aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay soo saareysaa Xeerndaamiyaha soo socda:

Xeerndaamiyaha Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha Isgaarsiinta

July, 2026

TUSMADA

<i>QEYBTA I—QODOBBADA HORDHACA AH.....</i>	<i>4</i>
Qodobka 1 ^{aad}	4
Magaca Xeer-nidaamiyaha	4
Qodobka 2 ^{aad}	4
Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha	4
Qodobka 3 ^{aad}	4
Qeexidda	4
<i>QEYBTA II—XUQUUQDA MACAAMIISHA IYO ILAALINTA ADEEGGA.....</i>	<i>9</i>
Qodobka 4 ^{aad}	9
libka iyo Xayaysiinta Adeegyada Isgaarsiinta	9
Qodobka 5 ^{aad}	11
Shuruudaha Heshiiska Adeegyada Isgaarsiinta	11
Qodobka 6 ^{aad}	15
Qodobka 7 ^{aad}	17
Heshiiska guud ee Macmiilka	17
Qodobka 8 ^{aad}	18
Beddelashada adeeg bixiyaha iyo La-guuridda lambarka	18
Qodobka 9 ^{aad}	18
Macaamiisha Wajahaya Xaalad Nuglaansho	18
Qodobka 10 ^{aad}	19
Qodobka 11 ^{aad}	19
Muddada Heshiiska iyo Joojinta Heshiiska.....	19
Qodobka 12 ^{aad}	21
Joojinta Adeegga	21
Qodobka 13 ^{aad}	21
Ilaalinta Xogta Shakhsiga ah ee Adeegyada Isgaarsiinta	21
Qodobka 14 ^{aad}	23
Maaraynta Cabashooyinka	23
Qodobka 15 ^{aad}	24
Heerarka Adeegga Macaamiisha iyo Xarunta Wicitaannada	24

Qodobka 16 ^{aad}	27
Go'idda Adeegga iyo Shabakadda.....	27
Qodobka 17 ^{aad}	28
Xeerarka Hab-dhaqanka (Codes of Practice)	28
<i>QEYBTA III—QODOBBADA GUUD.....</i>	29
Qodobka 18 ^{aad}	29
Kormeer	29
Qodobka 19 ^{aad}	29
U-hoggaansanaan	29
Qodobka 20 ^{aad}	29
Qodobka 21 ^{aad}	29
Qodobka 22 ^{aad}	30
Dhaqan-galka	30

Xeer-nidaamiyaha Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha Isgaarsiinta, 2026

QEYBTA I—QODOBBADA HORDHACA AH

Qodobka 1^{aad}

Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyayaashan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha Isgaarsiinta ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee 2026.

Qodobka 2^{aad}

Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha waa in:

- (a) la ilaaliyo xuquuqda iyo danaha macaamiisha iyo isticmaalayaasha kale ee adeegyada isgaarsiinta ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;
- (b) la horumariyo sinnaanta, hufnaanta iyo ku-dhaqanka habraacyada wanaagsan ee Adeeg bixiyeyaashu ku bixiyaan adeegyada isgaarsiinta.

Qodobka 3^{aad}

Qeexidda

Haddii aan si kale loogu qeexin xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, qeexidda erayada soo socda waa sidan:

- (1) **Sharciga** waxaa loola jeedaa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017;
- (2) **Hay'adda** waxaa loola jeedaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee lagu dhisay Qodobka 4aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka;
- (3) **Biil** waxaa loola jeedaa macluumaadka uu Adeeg bixiyaha siiyo ama ugu diyaariyo Isticmaale ee ku saabsan kharashyada lagu soo rogay ee la rabo in la bixiyo, ama lacagaha deynta iyo lacagaha baaqiga ah ee lagu dabaqay koontada Isticmaalaha;
- (4) **Xirmo adeegyo** waxaa loola jeedaa heshiis, ama laba heshiis ama in ka badan oo si dhow isugu xiran ama iskula xiriira, oo u dhexeeya Adeeg bixiyaha adeegga isgaarsiinta iyo isticmaalaha ugu dambeeya, kaas ookhuseeya bixinta ugu yaraan mid ka mid ah adeegyada soo socda:
 - (i) adeegga internetka; ama
 - (ii) adeeg isgaarsiin oo lambar ku salaysan (number-based service); iyo

- (a) sidoo kale la xiriira, ama marka la isu geeyo la xiriira, bixinta ugu yaraan mid ka mid ah adeegyada soo socda:/:
- (i) adeeg kale oo ku jira faqradda (a)(i) ama (ii);
 - (ii) adeeg kasta oo kale oo isgaarsiineed;
 - (iii)adeegga nuxurka; iyo/ama
 - (iv)qalabka lagu bixiyo adeegga isgaarsiinta(terminal equipment);
- (5) Muddada ballanqaadka (commitment period)waxaa loola jeedaa muddo ka bilaabanta taariikhda ay dhaqan-galaan qodobbada heshiiska ee ay ku heshiiyeen Adeeg bixiyaha iyo rukumeystaha (subscriber), kuna dhammaata taariikh heshiiskaas lagu cayimay, muddadaas oo Rukumeystaha laga rabo inuu bixiyo kharashka adeegyada, tas-hiilaadka iyo/ama qalabka yaalla goobta isticmaalaha ee qeexay heshiiska, Adeeg bixiyuhuna ku waajibayo inuu bixiyo adeegyadaas, tas-hiilaadka iyo/ama qalabka;
- (6) **Cabasho-gudbiye (complainant)** waxaa loola jeedaa:
- i. Macmiil loo aqoonsan yahay isticmaale ee uu Cabasho u gudbiya Adeeg bixiye;
 - ii. hal ama in ka badan oo Macaamiil ah, marka ay jiraan Macaamiil badan oo leh dano isku mid ah;
 - iii. haddii Macaamilku geeriyoodo, Dhaxal-sugihiisa ama Wakiilkiisa sharci ah ee Cabashada gudbiya;
- (7) **Cabasho** waxaa loola jeedaa muujinta qanacsanaan la'aan uu Macmiil ah Macaamil u gudbiyo Adeeg bixiye, taas oo la xiriirta mid ka mid ah arrimaha soo socda:
- i. bixinta uu Adeeg bixiyuhu u fidiyo Macmiilkaas adeegyada isgaarsiinta;
 - ii. habraaca maaraynta cabashooyinka ee Adeeg bixiyaha; ama
 - iii. heerka adeegga macaamiisha ee uu Macmiilkaasi helay;
- (8) **Macaamil** waxaa loola jeedaa:
- i. qof kasta oo adeegga isgaarsiinta ama Xirmo adeegyo u isticmaala ama u codsada adeegsi shakhsi ama guri, oo aan dib-u-iibin loogu talagelin; ama
 - ii. shirkad ama urur/hay'ad aan faa'iido-doon ahayn oo hesha ama heli karta hal ama in ka badan oo badeecooyin iyo adeegyo isgaarsiin ah oo aan dib-u-iibin loogu talagelin; iyo
- (9) **Macaamil ku jira xaalad nuglaansho** waxaa loola jeedaa Macaamil wajahaya duruufo si joogto ah ama ku-meelgaar ah saamayn aan fiicneyn ugu yeelan kara isticmaalkiisa adeegga isgaarsiinta, waxaana ka mid ah:

- (a) la noolaanshaha baahiyo gaar ah oo la aqoonsaday ay ka mid yihiin naafonimo garaad, naafonimo maskaxeed, naafonimo jireed, naafonimo dareemeed, naafonimo neerfeed, ama naafonimo waxbarasho;
- (b) da'da, ha ahaato da' aad u yar ama waayeelnimo;
- (c) ku noolaanshaha deegaan adeeggu ku yar yahay ama deegaan aan adeeggu gaarin;
- (d) isbeddel ku yimaadda duruufaha qofka ama qoyska, oo ay ku jirto murugo ka dhalatay geerida qof ehel ah;
- (10) **Macmiil** Macmiil kasta, ama Macmiil ganacsi aad u yar ah (microenterprise), ama Macmiil shirkad yar ah, ama urur/hay'ad aan faa'iido-doon ahayn;
- (11) **Hab kaydin xogeed waara (Durable Medium)** waxaa loola jeedaa hab kasta oo u saamaxaya Macmiilka inuu kaydiyo macluumaad isaga shakhsi ahaan loogu soo gudbiyey, uuna heli karo marka uu u baahdo mustaqbalka, isla markaana dib ula bixi karo xogtaas iyadoo aan wax laga badalin.
- (12) **Kharashka joojinta heshiiska ka hor muddadiisa (early termination charge)** waxaa loola jeedaa kharash laga yaabo in Rukumeystuhu bixiyo marka uu heshiiska joojiyo ka hor dhammaadka Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska;
- (13) **Isticmaalaha ugu dambeeya (End-user)', marka ay khusayso adeeg isgaarsiineed ama xirmo adeegyo,** waxaa loola jeedaa:
 - (a) qof, aan ahayn Adeeg bixiye, Macmiil u ah Adeeg bixiyaha bixiya adeegga isgaarsiin ama xirmada adeegyadaas;
 - (b) qof isticmaala adeeggaas ama xirmadaas, isaga oo aan u isticmaalaynin awooddiisa Adeeg bixiye adeeg isgaarsiineed; ama
 - (c) qof uu u oggolaaday qofka ku xusan farqadda (a) inuu isticmaalo adeeggaas ama xirmadaas.
- (14) **Qorshaha Qiimaha Ku Jira Adeegga (included value plan)** waxaa loola jeedaa qorshe adeeg isgaarsiineed oo moobil oo **lacag-bixintiisu tahay ka dib isticmaalka (post-paid)**, kaas oo **macmiilku** ku helo qiime adeeg bille ah oo ka badan khidmadda ugu yar ee billaha ah ee uu bixiyo, si loogu isticmaalo isku-dar adeegyo u qalma, oo ay ku jiraan wicitaannada caadiga ah ee gudaha dalka, adeegga farriimaha gaagaaban (SMS), iyo adeegyada xogta (Data).
- (15) **Adeeg bixiyaha laga guurayo (Losing Provider)** waxaa loola jeedaa bixiyaha adeegga isgaarsiinta ee uu macmiilku ka guurayo, kaas oo laga wareejinayo macmiilka sababo la xiriira joojinta adeegga, si waafaqsan Qodobka 12aad.
- (16) **Waayidda adeegga** waxaa loola jeedaa:

- (a) marka la fiiriyo Adeegga isgaarsiinta ka aan guurguurin,
- (i) Macmiilku awoodi waayo inuu wicitaan sameeyo ama lasoo wici karo; ama
 - (ii) adeeggu oggol yahay oo keliya gudbin xog oo hal dhinac ah;
- (b) marka Macmiilku awoodi waayo inuu isticmaalo internet-ka, taas oo ka dhalatay isbedel ku yimid shaqada shabakada isgaarsiinta, ha noqoto mid qorsheysan (planned change) ama mid aan qorsheysneyn (unplanned change) (iyo/ama qaybaha ka mid ah shabakadda ama shabakadahaas) ee uu bixiyo bixiyaha adeegga isgaarsiinta ee macmiilka, ama uu u adeegsado bixinta adeegyadiisa, oo ay ku jirto cillad kasta oo ku timaadda qalabka.
- (17) **Taariikhda guurinta adeegga (migration date)** waxaa loola jeedaa taariikhda uu codsado Macmiilka u wareegaya adeeg bixiye kale, marka ay farsamo ahaan suurtagal tahay, ama sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah;
- (18) **Macmiilka (moobeel) ee u wareegaya adeeg bixiye kale** waxaa loola jeedaa macmiilka ka guuraayo adeeg bixiyaha ama u guuraayo adeeg bixiye kale, kaas oo codsaday ama codsan doono in lambarkiisa loo wareejiyo sida ku cad qodobka 8(6).
- (19) **Macmiilka Ganacsiga Aad u Yar, Yar ama Dhexdhexaad ah (MSME)** waxaa loola jeedaa, macmiil ka mid ah Shirkadaha Aad ka u Yar, Dhexdhexaad ah, si waafaqsan Sharciga Shirkadaha ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.
- (20) **La-guuridda lambarka Ama Wareejinta Lambarka (Number Portability)** waxaa loola jeedaa hab u suurtoogelinaya Macaamiisha Wareegaya (Switching Customers) ee codsada inay sii haystaan lambarkooda ama lambaradooda taleefan marka ay u wareegayaan Bixiye Adeeg Isgaarsiineed kale oo ka hawlgala shabakad isgaarsiineed dadweyne, iyada oo aan loo eegin cidda adeegga ka bixisa barta dhammaadka shabakadda (network termination point) ee Macmiilka Wareegaya, waase in sii haysashada lambarka taleefanku waafaqsanaato Qorshaha Qaran ee Lambareynta Taleefannada (National Telephone Numbering Plan).
- (21) **Xogta shakhsiga ah** waxaa ka mid ah lambarka taleefoonka macmiil ka, xogta deegaanka, qulqulka xogta iyo xog kasta oo kale oo lagu qeexay Sharciga Dhowrista Xogta ee 2023.
- (22) **Habraaca la-guuridda lambarka** waxaa loola jeedaa habraaca La-guuridda lambarka si waafaqsan Qodobka 8aad, waxaana ku jira hawlgelinta uu Adeeg bixiyaha loo guurayo ku sameeyo lambarka ama lambarada taleefoonka iyo/ama lambarka ama lambarada moobeelka ee lala guuray;

- (23) **Lambarka Oggolaanshaha Wareejinta Lambarka (porting authorisation code)** waxaa loola jeedaa lambar gaar ah oo muujinaya oggolaanshaha Adeeg bixiyaha laga guurayo ee xaqiijinaya in Macmiilka u wareegaya adeeg bixiye kale uu xaq u leeyahay inuu codsado oo lambarkiisa moobeelka ula guuro shirkad kale oo adeegga isgaarsiinta bixisa;
- (24) **Ogeysiinta ka hor isticmaalka (pre-use notice)** waxaa loola jeedaa ogeysiis uu Adeeg bixiye ka sheego xaaladda adeegsiga tiknoolajiyada go'aan-qaadasho iskeed u sameysa, isagoo ku wargelinaya Macaamiisha xaqooda ay u leeyihiin inay ku biiraan (opt in) ama ka baxaan (opt out) isticmaalka tiknoolajiyadaas,
- (25) **Adeeg bixiyaha loo guurayo** waxaa loola jeedaa Adeeg bixiyaha macmiilka u guurayo sida ku cad Qodobka 8aad, ama si waafaqsan Qodobka 12aad;
- (26) **Adeegga khuseeya** waxaa loola jeedaa adeegga isgaarsiinta ee Adeeg bixiye Rukhsad u haysto inuu bixiyo sida ku cad Sharciga;
- (27) **Heshiiska Heerka Adeegga** waxaa loola jeedaa heerarka tayada adeegga ee shirkadahu ku bixiyaan adeegga sida heshiiska macmiilka lagu qeexay;
- (28) **Dammaanadda Heerka Adeegga (service level guarantee)** waxaa loola jeedaa magdhowga lagu bixinayo heshiis, haddii Bixiyaha Adeegga uu ku guuldareysto inuu buuxiyo heshiiska heerka adeegga (Service Level Agreement).
- (29) **Adeeg bixiye** waxaa loola jeedaa qof (sida macnaha ku cad Qodobka 41aad ee Sharciga) bixiya adeegga isgaarsiinta, ama Shatiyeeye,
- (30) **Lambarka oggolaanshaha joojinta adeegga (service termination authorization code)** waxaa loola jeedaa lambar gaar ah oo muujinaya oggolaanshaha Adeeg bixiyaha laga guurayo ee xaqiijinaya in macmiilka xaq u leeyahay inuu u wareego adeeg bixiye kale oo isaga oo aan la guureynin Lambarkiisa Moobeelka;
- (31) **Adeeg si gaar ah loo habeeyey (specialized service)** waxaa loola jeedaa adeeg aan ahayn adeegga internetka oo lagu bixiyo nuxur gaar ah (content), barnaamijyo ama adeegyo, ama isku-darkooda;
- (32) **Rukumeyste (subscriber)** waxaa loola jeedaa Isticmaale kasta oo heshiis la galay adeeg bixiyaha isgaarsiinta ama Xirmo adeegyo, si loo siiyo adeegyadaas ama Xirmada adeegyadaas; iyo
- (33) **Maalin shaqo** waxaa loola jeedaa maalin aan ahayn Jimce ama maalin fasax qaran oo si rasmi ah loo shaaciyey.

Qodobka 4^{aad}

Iibka iyo Xayaysiinta Adeegyada Isgaarsiinta

- (1) Adeeg bixiyaha iibiya ama xayaysiiya adeegyada isgaarsiinta waa inuu Macaamiisha siiyaa xog sax ah aan marin habaabin laheyn, isagoo adeegsanayaa hab keydin waarta.
- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuu xayaysiiskiisa ku daraa shuruud, xaddidaad, qeexitaan ama xanibaad kasta oo muhiim ah oo khuseysa Bandhigga adeegga, si Macaamiishu u sameeyaan Doorasho xog-ogaal ah.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu warbixin kooban oo ku saabsan waajibaadka ku saabsan iibka iyo xayaysiinta ku daabacaa boggiisa internet ka, qaab si fudud loo heli karo, ama habka iyo qaabka ay Hay'adda qeexdo.
- (4) Adeeg bixiyuhu, marka uu Macmiil codsado, waa inuu Macmiilka si bilaash ah oo Muddo macquul ah gudaheed ku siiyaa nuqul ka mid ah waajibaadkiisa iibka iyo xayaysiinta.
- (5) Marka Adeeg bixiyuhu si toos ah ama Dhinac saddexaad u soo maro oo uu Tafaariiqle (retailer) qandaraas kula galo iibinta ama xayaysiinta adeegyadiisa, Rukhsadluhu waa inuu:
 - (a) Tafaariiqlaha ku wargeliyaa waajibaadyada ku xusan faqrada (1) ilaa (4) ee kor ku xusan; iyo
 - (b) Xaqiijiyaa in Tafaariiqlaha:
 - (i) macluumaad kasta oo uu Macaamiisha siiyo yahay mid sax ah oo aan marin habaabin lahayn;
 - (ii) Macaamiisha weydiyo inay doonayaan in macluumaadka lagu siiyo Hab kaydin xogeed waara, hadii macaamiisha ay sidaas doortaan, Tafaariiqluhuna waa inuu macluumaadka ku siiyaa qaabkaas.
 - (iii) Uu kaydiyo diiwaannada iibka adeegyada ee Adeeg bixiyaha, oo ay ku jiraan taariikhda iibka, habka heshiiska loo galay iyo goobta heshiiska lagu galay, muddo aan ka yarayn lix bilood; iyo marka ay khusayso, diiwaannada Dhiirrigelinta Iibka ee la xiriirta, muddo aan ka yarayn 90 maalmood kaddib taariikhda kama dambaysta ah ee ay ahayd in Dhiirrigelinta Iibkaas si buuxda looga faa'iidaysto.

- (6) Adeeg bixiyaha ,ka hor inta uusan gelin ama wax ka beddelin heshiiska khuseeya Adeegga, Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in Macmiilka:
- (a) Awood sharci u leeyahay inuu galo heshiiska;
 - (b) rabo inuu heshiiskan galo; iyo
 - (c) in si cad, sax ah, fudud oo la fahmi karo loogu siiyey macluumaadka lagu qeexay Qodobka 5aad (Shuruudaha Heshiiska Adeegyada Isgaarsiinta), iyadoo la adeegsanayo Hab kaydin xogeed waarta oo Macmiilku heli karo ama adeegsan karo ka hor inta uusan heshiisku ku waajibin, marka laga reebo xaaladda ay khuseyso faqrada (7).
- (7) Haddii heshiiska lagu galo ama wax lagaga beddelo qaab wicitaan iib taleefan ah, macluumaadkana aan lagu siin karin hab kaydin xogeed ee waarta ka hor inta heshiisku aanu Macmiilka ku waajibin, Adeeg Bixiyuhu waa inuu macluumaadka soo socda af ahaan ugu gudbiyaa macmiilka inta wicitaanku socdo:
- (a) aqoonsiga qofka shirkadda ka socdo ee macmiilka heshiiska la galayo (Telefoon kiisa, cinwaanka deegaanka, Faksimilaha, iyo iimeeyl ka);
 - (b) sharraxaadda Adeegga khuseeya sida: kharashaadka muhiimka ah, oo ay ku jiraan kharashaadka ugu yar ee heshiiska waajibinaayo iyo kharaashaadka waajibaya haddii heshiiska la joojiyo muddadiisa ka hor; Shuruudaha lacag-bixinta; jiritaanka Xaqa joojinta heshiiska (haddii uu jiro) oo ay ku jiraan habraacyada joojinta; taariikhda la filayo in Adeegga la siiyo macmiilka, haddii bixinta Adeegga aysan ahayn mid degdeg ah; iyo Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska.
- (8) Marka Adeeg bixiyaha ama Tafaariiqlihiisa uu macmiilka u soo bandhigo Dhiirrigelinta iibka oo aan macmiilku isla markiiba ka faa'iidayan karin, balse uu xaq u yeesho inuu helo kaddib marka uu galo heshiiska Adeegga khuseeya, Adeeg bixiyuhu waa inuu:
- (a) uusan soo rogin Shuruudo xaddidaya; iyo
 - (b) macmiil ugu soo gudbiyaa xogta si cad, sax ah, oo la fahmi karo iyadoo la adeegsanayo hab kaydin xogeed waarta. Haddii soo bandhigidda xogta ay noqoto qaab wicitaan teleefan ah, adeeg bixiyaha waa in uu macmiilka siiyaa xogta soo socota:
 - (i) aqoonsiga shakhsi sharciyeed (legal entity) ee soo bandhigaya dhiirrigelinta iibka oo ballanqaadaya inuu buuxiyo waajibaadyada la xiriira, iyo cinwaankiisa iyo taleefanka, Fakiska, iyo/ama iimaylka;
 - (ii) faahfaahinta dhiirrigelinta iibka; iyo

(iii)shuruudaha iyo qodobbada Dhiirrigelinta iibka, oo ay ku jirto sharraxaad cad oo faahfaahsan oo ku saabsan habraaca ay tahay inuu macmiilku raaco si uu u helo.

(9) Adeeg bixiyuhu waa inuu caddeeyaa Xaddidaad kasta oo muhiim ah oo khuseysa Xayaysiintiisa gaarka ah (special promotions), oo ay ku jiraan qodobbada aasaasiga ah, waqtiyada iyo xaq u yeelashada

(10) Marka Macmiilku galo ama wax ka beddelo heshiis inta lagu jiro iib lagu sameeyay qaab wicitaan teleefan ah, sida ku cad faqrada (7), ama marka bandhigga dhiirrigelinta lagu sameeyo qaab wicitaan ah sida ku cad faqradda (8), adeeg bixiyuhu waa in macluumaad ka uu macmiilka ugu diraa qaab hab keydin xogeed waarta muddo macquul ah gudaheed kadib wicitaan ka.

Qodobka 5^{aad}

Shuruudaha Heshiiska Adeegyada Isgaarsiinta

(1) Adeeg bixiyuhu, marka laga reebo Adeegga isgaarsiinta ee mashiinada dhexdooda, waa inuu macmiilka, Isticmaalaha ama Rukumeystaha ku siiyaa Hab kaydin xogeed waara macluumaad cad, si fudud loo fahmi karo oo waqtigiisa ku habboon oo ku saabsan adeegyada la soo bandhigay iyo Shuruudaha iyo qodobbada khuseeya adeegga, kaas oo ku filan inuu Macaamilka, macmiilka, Isticmaalaha ama Rukumeystaha u suurtageliyo inuu ka gaaro go'aan xog-ogaal ah adeegga.

(2) Macluumaadka ku xusan faqrada (1) waa in ay ku jiraan waxyaabaha soo socda: inuu xaalad kasta ku jiraa:

- a) aqoonsigiisa, sida Magaca ganacsiga;
- b) lambarka taleefoonka, haddii la heli karo;
- c) Cinwaanka diiwaangashan;
- d) lambarka fax-ka, haddii la heli karo;
- e) cinwaanka iimaylka, haddii la heli karo; iyo
- f) cinwaanka juqraafigeed ee goobta ganacsiga iyo halka Macmiilku uga soo gudbin karo cabashadiisa (haddii uu ka duwan yahay cinwaanka diiwaangashan); iyo

Sharraxaadda adeegyada

- g) Astamaha ugu muhiimsan ee adeegga la bixiyey, oo ay ku jiraan:

- (i) heer kasta oo ugu yar ee Tayada Adeegga ah, oo uu ku jiro Heshiiska Heerka Adeegga;
- (ii) marka aan la bixin heerarka ugu yar ee Tayada Adeegga, bayaan arrintaas caddeeya; iyo, marka ay khusayso, jiritaanka iyo shuruudaha Adeegyada iibka kaddib iyo Dammaanadaha ganacsiga.
- (h) haddii ay khusayso, jiritaanka iyo shuruudaha adeegyada iibka ka dambeeya (after-sales services) iyo dammaanadaha ganacsi (commercial guarantees).

Qiimaha

- (i) Qiimaha adeegga, oo ay ku jirto canshuurta iibka (VAT), oo ay ku jiraan:
 1. Qiimaha aasaasiga ah ee rukumashada;
 2. Kharashka isticmaalka ee adeegyada dheeraadka ah ama isticmaalka adeegyo ama tas-hiilaad dheeraad ah oo aan ku jirin faqradda (a);
 3. Kharash kasta oo hawlgelineed (activation charges), hadii ay jiraan;
- (ii) Macluumaadka isbeddelka qiimaha aasaasiga ah ee rukumashada.

Bixinta adeegga

- (i) qorshayaasha lacag-bixinta; iyo
 - (ii) qorshayaasha bixinta Adeegga ama adeegyada isgaarsiinta, oo ay ku jirto taariikhda la filayo in adeegga ama adeegyada la bixiyo.
- (a) *Muddada, cusboonaysiinta iyo joojinta heshiiska*
- (i) Muddada heshiiska, oo ay ku jirto Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska;
 - (ii) isticmaalka ama muddada ugu yar ee loo baahan yahay si looga faa'iidaysto Shuruudaha xayaysiinta;
 - (iii) shuruudaha Cusboonaysiinta iyo Joojinta heshiiska, oo ay ku jiraan Kharashaadka ka ratibma joojinta heshiiska ka hor muddadiisa iyo Muddada ogeysiinta ee laga rabo Macmiilku inuu soo gudbiyo si uu heshiiska uga baxo;
 - (iv) macluumaadka ku saabsan sii haysashada Qalabka yaalla goobta isticmaalaha marka ay dhammaato Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska, oo ay ku jiraan kharash kasta oo la xiriira;

- (v) macluumaadka ku saabsan xaq Lacag-celinta ee Lacag kasta oo baaqi ah oo ka hartay Adeegyada lacagtooda horay loo bixiyay marka laga guuraayo adeeg bixiyaha.

Ilaalinta xogta

- h)macluumaadka ku saabsan Xogta shakhsiga ah ee ay tahay in la bixiyo ka hor fulinta adeegga ama la ururinayo si adeegga loo bixiyo

Amniga

- i)nooca tallaabada uu Adeeg bixiyuhu qaadi karo si uu uga jawaabo Dhacdooyinka iyo Khataraha ama Nuglaanshaha amni.

Isticmaaleyaasha baahiyaha gaarka ah qaba

- j)faahfaahinta qalabka iyo adeegyada loogu talagalay Isticmaaleyaasha baahiyaha gaarka ah qaba iyo sida loo heli karo macluumaadka arrintaas ku saabsan.

Tallaabooyinka sixitaanka, Maaraynta cabashooyinka iyo Xallinta khilaafaadka

- k)habraacyada Xallinta khilaafaadka, oo ay ku jiraan khilaafaadka gudaha iyo dibadda, si waafaqsan habka garsoor dhaqameed ka ee uu adeeg bixiyuhu isticmaalo

- l)qorshe kasta oo Magdhow iyo Lacag-celin ah, oo ay ku jiraan;

- (i)tixraac cad oo ku saabsan xuquuqda Macaamiisha, oo uu ku jiro Magdhow kasta sida Dammaanadaha Heerka Adeegga, haddii aan la buuxin heer kasta oo ugu yar ee Tayada Adeegga ay shirkadda soo bandhigtay, sida Heshiiska Heerka Adeegga; iyo

- (ii)tixraac cad oo ku saabsan xuquuqda Macaamiisha ee lagu dabaqayo haddii Adeeg bixiyuhu si aan ku filnayn uga jawaabo Dhacdo, Khatar ama Nuglaansho amni.

- (3) Adeeg bixiyaha bixiya Adeegyada internetka waa inuu, marka lagu daro macluumaadka looga baahan yahay faqrada (2), Macmiilka siiyaa macluumaadka soo socda:

Astaamaha adeegga

(a)heer kasta oo ugu yar ee Tayada Adeegga ah, oo uu ku jiro Heshiiska Heerka Adeegga, marka la bixiyo, ee ku saabsan:

1. Daahitaanka gudbinta xogta (latency);
2. Kala-duwanaanshaha daahitaanka(jitter);
3. Lumista xirmooyinka xogta (packet loss)

(b)macluumaadka ku saabsan sida Tallaabooyinka maaraynta qulqulka xogta ee Adeeg bixiyuhu adeegsado u saamayn karaan Tayada Adeegyada internetka, Asturnaanta xogta macmiilka iyo Ilaalinta Xogtiisa shakhsiga ah;

(c)sharraxaad cad oo si fudud loo fahmi karo oo ku saabsan sida Xaddidaadda mugga xogta (volume limitation), xawaaraha iyo Halbeegyada kale ee Tayada Adeeggu ee saamayn kara Adeegyada internetka, gaar ahaan isticmaalka nuxurka (content), iyo barnaamijyada;

(c)sharraxaad cad oo si fudud loo fahmi karo oo ku saabsan sida Adeeg kasta oo si gaar ah loo habeeyey ee uu Macmiilku rukuntay oo saamayn karo adeegyada internetka ee la siiyo;

(e)sharraxaad cad oo si fudud loo fahmi karo oo ku saabsan:

(i)Shabakadaha isgaarsiinta aan guurguurin (fixed networks): Xawaaraha soo-dejinta iyo Xawaaraha kor-u-dirista ee Adeegyada internetka, oo ah xawaaraha ugu yar, Xawaaraha sida caadiga ah la heli karo, Xawaaraha ugu sarreeya iyo Xawaaraha la xayaysiiyey;

(ii)Shabakadaha moobeelka (Mobile Networks): qiyaasta xawaaraha ugu sarreeya iyo Xawaaraha la xayaysiiyey ee soo-dejinta iyo kor-u-dirista ee Adeegyada internetka; iyo

(ii)Sida farqiga weyn ee u dhexeeya xawaaraha dhabta ah iyo xawaaraha la xayaysiiyey ee soo-dejinta iyo kor-u-dirista u saamayn karo adeegsiga xuquuqda Isticmaalayaasha.

Qiimaha

(f)Hadii adeegga ay ku jiraan xirmooyin, qiimaha qayb kasta oo xirmada adeegyada ka mid ah, waa in si gooni gooni ah loo xayaysiiyaa amaa loo cadeeyaa intii suurtoagal ah;

(g)faahfaahinta Qorshaha ama qorshayaasha qiimaha adeegga ee heshiiska, oo ay ku jiraan faahfaahinta adeegyada ku dhex jira, sida daqiiqadaha,

awoodda internet ka (gigabytes), fariimaha. Sidoo kale qiimayaasha dheeraadka ah hadii la isticmaalo adeegyo dheeraad ah.

(h)hadii Qorshaha ama qorshayaasha qiimaha adeegga ee leh mug isgaarsiin (communication volume) oo hore loo cayimay, suurtagalnimada in mug kasta oo aan la isticmaal in ee muddada biilkii hor dib loogu dhigo muddada biilka ee xigta, hadii heshiiska lagu daray;

(i)habraaca lagu ilaalinayo Daahfurnaanta biilka laguna kormeerayo heerka isticmaalka;

(j)macluumaadka Qiimaha adeegga ee ku saabsan lambarro ama adeegyo kasta oo leh Shuruudo qiimeyn gaar ah, oo uu ku jiro Kharash kasta oo helitaanka adeegga khuseeya;

(k)faahfaahinta iyo shuruudaha, oo ay ku jiraan khidmadaha, Adeeg kasta oo iibka kaddib, Adeegga hagaajinta iyo caawinta macaamiisha; iyo

(l)habka loo heli karo macluumaadka ugu dambeeyay ee dhammaan Qiimayaasha adeegga iyo Kharashyada hagaajinta ee khuseeya adeegga.

Muddada, cusboonaysiinta iyo joojinta heshiiska

(m)shuruudaha Joojinta Xirmada adeegyada ama qaybo ka mid ah, marka adeegga lagu bixiyo qayb ka mid ah xirmo adeegyo.

Qodobka 6^{aad}

Qaansheegad-bixinta

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu macmiilka ku siiyaa Hab kaydin xogeed waarta, ama qaab kale oo la heli karo oo la adeegsan karo oo ay Hay'addu oggolaato, macluumaad ka saabsan:

(a) muddada biilka;

(b) Kharashyada iyo Qiimo-dhimista;

(c) Qaabka lagu gudbiyo biilka, sida Biil waraaq ah ama Biil elektaroonig ah, ee uu diyaariyey Adeeg bixiyuhu;

(d) Hab kasta oo biil-samaynta ah;

(e) Shuruudaha iyo qodobbada lagu dabaqayo Biilka Adeeg bixiyaha, Hab kasta oo biil-samaynta ah, inta jeer ee la soo saaro iyo lacag-bixintiisa;

(f) Habraacyada lagu caawinaayo macaamiisha ay culeys ka haysato bixinta Biilka; iyo

(g) Qaabka la socodka biilka.

(2) Biilka adeegga isgaarsiinta waa inuu ka kooban yahay:

- (a) Magaca iyo cinwaanka macmiilka ama macaamiilka hore ;
(The Customer's or former Customer's billing name and address;)
- (b) Magaca ganacsiga ee Adeeg bixiyaha;
(The Service Provider's trading name;)
- (c) Taariikhda la soo saaray Biilka iyo lambar aqoonsi biil oo taxane ah;
- (d) Muddada biilka;
- (e) Lambarka tixraaca koontada;
- (f) Tixraaca macmiilka ee la isticmaalayo marka lacagta online-ka lagu bixinayo;
- (g) Taariikhda kama-dambaysta ah ee lacag-bixinta ee hadda ee Kharashyada Biilka ku qoran iyo Taariikhda kama-dambaysta ah ee lacag-bixinta ee Lacagta weli lagu leeyahay, haddii ay jirto;
- (h) Ugu yaraan hal hab lacag-bixin uu macmiilka isticmaali karo isagoo aan laga qaadin wax khidmo maareeyn adeeg ah (processing fee)
- (i) Macluumaadka Kharash kasta oo dheeraad ah oo lagu dabaqayo hadii ay jirto habka lacag-bixin oo ka baxsan kuwa caadiga ah.
- (j) Magaca ama tixraaca adeegga uu biilku khuseeyo;
- (k) Kharash kasta oo dhaafay xadka kharashka ama xadka Qoondada adeegga ee qorshaha ku jirta;
- (l) Sharraxaadda Kharashyada ku jira Biilka, oo ay ku jiraan wadarta lacagta biilka iyo Qiimo-dhimis ama Lacag baaqi ah oo lagu dabaqayo Biilka ama Kharashka, oo ay ku jiraan kharash kasta oo dhinac saddexaad;
- (m) Biilasha ay ku jiraan kharashyada Qorshe adeegyo ku jira qiimaha rukumashada, wadarta lacagta Biilka ee mid kasta oo ka mid ah labadii muddo biil ee ka horreeyey;
- (n) Biilasha ay ku jiraan kharashyada Qorshe adeegyo ku jira qiimaha rukumashada, taas oo laga heli karo barta internetka ee Adeeg bixiyaha oo uu Macmiilku ka heli karo, ama tilmaamaha halka uu Macmiilku ka heli karo, macluumaadka isticmaalka wicitaannada iyo xogta isticmaalka internet (internet usage data),
- (o) Habk macmiilka uu ula soo xiriir karo shirkadda si uu wax uga ogaado ama u waydiiyo arimaha biilka, taas oo ay ku jirto ugu yaraan lambar taleefoon;

- (p) Barta xiriirka oo uu macmiilka hore ka heli karo macluumaadka qiimaha, haddii aan laga heli karin barta xiriirka ee lagu sheegay (o);
 - (q) saacadaha shaqada ee Barta xiriirka macaamiisha ee (o) ee kor ku xusan, haddii Barta xiriirku shaqayso wax ka yar 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii; iyo
 - (r) in la cadeeyo in kharashka wicitaannada waydiinta biil ka, hadii uu la mid yahay qiimayaasha caadiga ah ee wicitaannada gudaha ama mid ka sareeya.
 - (s) Kharashka canshuuraha khuseysa, oo ay ku jirto Canshuurta iibka (VAT), oo si gooni ah loo muujiyey ama qayb ka ah wadarta lacagta
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa Saxnaanta biilka iyo in Macmiilka uu si fudud u heli karo macluumaad ku filan oo uu ku xaqiijiyo in Kharashyadu sax yihiin oo waafaqsan yihiin:
- (a) Kharashyada iyo Qiimo-dhimista uu Adeeg bixiyuhu daabacay ama heshiiska lagu dejiyey; iyo
 - (b) Adeegyada isgaarsiinta ee uu macmiilka codsaday, isticmaalay ama heshiis ku galay inuu helo.
- (4) Adeeg bixiyuhu, marka uu Macmiil codsado, iyadoon loo eegin in macluumaadka hore loogu qoray Biil ama si kale loo diyaariyey, waa inuu Macaamiisha si bilaash ah oo muddo macquul ah gudaheed ku siiyaa dhammaan macluumaadka biilka ee la xiriira adeegga isgaarsiinta ee Macmiilkaas ama Macmiilkii hore.
- (5) Marka Adeeg bixiyuhu biilka macmiilka ku daro kharash dhinac saddexaad, Adeeg bixiyuhu waa inuu ka jawaabaa dhammaan weydiimaha oo uu xalliyaa dhammaan cabashooyinka loo gudbiyo ee ku saabsan kharashyada dhinaca saddexaad.
- (6) Adeeg bixiyuhu waa inuu 24 saacadood gudahood joojiyaa biil-samaynta adeegga marka uu helo ogeysiiska macmiilka ee Joojinta heshiiska.

Qodobka 7^{aad} **Heshiiska guud ee Macmiilka**

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu Hay'adda u gudbiyaa, si ay u ansixiso, Heshiiska guud ee Macmiilka ee lagu dabaqayo Adeeg kasta oo khuseeya oo uu dadweynaha u soo bandhigo, 14 Maalmood oo shaqo ka hor Dhaqan-gelidda heshiiska.

- (2) Heshiiska guud ee Macmiilka waa inuu ka koobnaadaa sharraxaadda adeegga, Shuruudaha lacag-bixinta, mas'uuliyadda Macmiilka, siyaasadda ilaalinta xogta, hababka maaraynta cabashooyinka iyo xallinta khilaafaadka.
- (3) Marka Hay'addu hesho heshiiska ku xusan faqrada (1), waa inay 7 Maalmood oo shaqo gudahood qaaddaa mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:
 - (a) ansixisaa Heshiiska guud ee Macmiilka;
 - (b) ansixisaa Heshiiska guud ee Macmiilka, iyadoo ku talinaysa in Adeeg bixiyuhu sameeyo wax-ka-beddellada ay Hay'addu qeexday; ama
 - (c) diiddaa ansixinta Heshiiska guud ee Macmiilka, iyadoo caddeynaysa sababaha.
- (4) Adeeg bixiyuhu waa inuu heshiisyadiisa dheeraadka ah ee uu la galo rukhsadlayaasha kale ku daraa Heerarka Tayada Adeegga ee dhowraya xuquuqda Macaamiisha

Qodobka 8^{aad}

Beddelashada adeeg bixiyaha iyo La-guuridda lambarka

- (1) Adeeg bixiye kastaa waa inuu u hoggaansamaa Xeer-nidaamiyayaasha La-guuridda lambarka, oo ay ku jiraan dhammaan habraacyada, Tilmaamaha farsamo iyo shuruudaha hawlgalka ee ay Hay'addu diyaarisay ama mustaqbalka diyaarin doonto, qeexi karto ama wax ka beddeli karto, Iyadoo la raacayo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017; waana inuu fuliyo Tallaabooyinka farsamo iyo kuwa maamul ee ay Hay'addu uga baahan tahay si La-guuridda lambarka si buuxda loogu dhaqan-geliyo.

Qodobka 9^{aad}

Macaamiisha Wajahaya Xaalad Nuglaansho

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiya in macaamiisha baahiyaha gaarka ah qaba iyo Macaamiisha duruufahoodu sababtay nuglaansho, si buuxda loogu tixgeliyo horumarinta iyo bixinta adeegyadiisa.
- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuu macaamiisha baahiyaha gaarka ah qaba iyo Macaamiisha ku jira xaalad nuglaansho siiyaa fududeyn macquul ah, oo ay ku jiraan qaab ay ku heli karaan heshiisyada, Biilasha iyo hababka Cabashooyinka ah, iyo caawimaad ku habboon helitaanka iyo isticmaalka adeegyadiisa.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu, saddex (3) bilood gudahood laga bilaabo Daabacaadda Xeer-nidaamiyayaashan ama saddex bilood gudahood marka Rukhsadda la siiyo, dejiyaa oo

daabacaa siyaasado iyo habraacyo xaqiijinaya in Isticmaaleyaasha baahiyaha gaarka ah qaba iyo Macaamiisha duruufahoodu sababtay nuglaansho loola dhaqmo si caddaalad ah oo habboon.

- (4) Marka Adeeg bixiyuhu codsado caddeynta xaaladda nuglaanshaha ee la xiriirta bixinta adeegyada isgaarsiinta, Adeeg bixiyuhu waa inuu, si waafaqsan Qodobka 12aad iyo Sharciga Dhowrista Xogta (2023):
- (a) Kaliya kaydiyaa caddeyta loo baahanyahay, muddada looga baahan yahay dhammaystirka Qiimayntaas; iyo
- (b) Inuu burburiyaa wax kasta ama caddeyn ah si ammaan ah u tuuraa ama u burburiyaa marka Qiimayntaas la dhammaystiro.
- (5) Adeeg bixiyuhu waa inuu Isticmaalayaasha baahiyaha gaarka ah qaba iyo Macaamiisha ku jira xaalad nuglaansho u diyaariyaa faahfaahinta xiriirka iyo qaabka caawinta ee lagu xusay Qodobka 15(2), waana inuu siyaasadaha iyo habraacyada Qodobkan ku xusan cusboonaysiiyaa oo dib u eegaa ugu yaraan labadii sanaba mar.
- (6) Adeeg bixiyuhu, marka ay Hay'addu codsato, waa inuu soo gudbiyaa macluumaadka ku saabsan U-hoggaansanaanta iyo Dhaqan-gelinta Qodobkan.

Qodobka 10^{aad}

Ilaalinta Carruurta ee Adeegyada Internetka

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu, iyadoo la raacayo Qodobka 64aad ee Sharciga:
- (a) dejiyaa habab ka hortagaya in Carruurtu helaan Adeegyada isgaarsiinta ama Nuxurka waxyeellada leh; iyo
- (b) dejiyaa habab u suurtageliya Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta sharciga ah inay xakameeyaan helitaanka Carruurta ee Nuxur ka waxyeellada leh.

Qodobka 11^{aad}

Muddada Heshiiska iyo Joojinta Heshiiska

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka siiyaa macluumaadka ku saabsan Muddada heshiiska, shuruudaha Cusboonaysiinta iyo Joojinta heshiiska, oo ay ku jiraan kharash kasta oo joojinta heshiiska ka hor muddadiisa iyo Muddo ogeysiis kasta oo khuseysa oo laga rabo Macmiilku inuu bixiyo si uu heshiiska uga baxo.

- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuusan heshiis uu la galayo Macmiil ku darin qodob dhigaya Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska oo ka badan 24 bilood, marka laga reebo Heshiis lacag-bixin qaybsan oo loogu talagalay xiridda qalabka shabakadda.
- (3) Adeeg bixiyuhu wuxuu heshiiska ku xusan faqrada 11(1) cusboonaysiin karaa oo keliya marka uu helo oggolaansho cad oo Macmiilka ah.
- (4) Iyadoo aan loo eegin Muddada ku-xirnaanshaha heshiiska ee ku xusan faqrada 11(1) iyo 11(2), Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in shuruudihiisa Joojinta heshiisku aanay Macaamiisha ka hor istaagin Beddelashada adeeg bixiyaha.
- (5) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka, si cad, si fudud, la fahmi karo oo sax ah, ugu siiyaa Hab kaydin xogeed waarta ogeysiis ugu yaraan hal bil ah oo ku saabsan Wax-ka-beddel kasta oo heshiiska la xiriira Adeeg, Xirmo adeegyo ama qayb kasta oo heshiiska Macmiilka ah, haddii aanu wax-ka-beddelkaasi:
- (a) dan ugu jirin Macmiilkaas;
 - (b) ahayn mid maamul oo keliya oo aan wax saamayn ku lahayn Macmiilka; ama
 - (c) si toos ah Sharcigu u waajibin.
- (6) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka ku wargeliyaa xaqiisa uu heshiiska wax laga beddelayo ku joojin karo kharash la'aan sida ku cad faqrada 11(5), hal (1) bil gudaheed laga bilaabo Ogeysiiska. Marka sidaas loo joojiyo, Macmiilku wuxuu mas'uul ka noqonayaa oo keliya:
- (a) Kharashyada ururay ilaa taariikhda uu wax-ka-beddelku dhaqan-galayo; ama
 - (b) Qiimaha Qalab kasta oo yaalla goobta isticmaalaha ee uu Macmiilku doorto inuu sii haysto.
- (7) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka ku wargeliyaa xaqiisa uu heshiiska ku joojin karo wakhti kasta.
- (8) Marka Adeeg bixiyuhu helo Ogeysiis joojin sida ku cad faqrada 11(7), Adeeg bixiyuhu waa inuu:
- (a) isla markiiba joojiyaa Biil-samaynta si waafaqsan Qodobka 6(6); ama
 - (b) Macmiilka ugu soo celiyaa 30 maalmood gudahood marka heshiis lagu joojiyo lacag kasta oo laga qaaday laga bilaabo taariikhda ogeysiiska.

Qodobka 12^{aad}

Joojinta Adeegga

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu, ugu yaraan saddex bilood ka hor Joojinta adeegga iyo ama kaddib marka uu muujiyo inuu joojin rabo adeegga:
 - (a) Hay'adda u gudbiyaa Istaraatiijiyadda maaraynta macaamiisha ee ku saabsan Wareejinta Macaamiishiisa jira loogu wareejinayo adeeg kale ama Adeeg bixiye kale oo bixiya adeegyo la mid ah; iyo
 - (b) in macaamiisha ay arrintu saamaysay si toos ah ugu wargeliyaa Joojinta adeegga, Wareejinta, Shuruudaha iyo qodobbada Adeeg bixiyaha loo guurayo, shuruudaha oggolaanshaha, Xaqa diidmada ama ka-bixidda, iyo hababka ay macaamiishu u joojin karaan adeegga ay ka helaan Adeeg bixiyaha oo ay xiraan koontooyinka jira ka hor joojinta adeegga ee la qorsheeyey.
- (2) Adeeg bixiyaha loo guurayo waa inuu Macmiilka ku wargeliyaa dhammaystirka wareejinta maalinta ay dhacdo; haddii Dhammaystirka wareejintu ku xiran yahay Dhinac saddexaad, maalinta Adeeg bixiyaha loo guurayo lagu wargeliyo dhammaystirkaas, balse aan ka dambayn 5 maalmood kaddib Dhammaystirka.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu joojiyaa heshiiska uu la galay macmiilka, kadib marka uu macmiilka so gudbiyay joojinta heshiiska isagoo adeegsanaya xaqa joojinta heshiiska (sida ku cad faqrada 12(1)(b)), muddo 7 maalmood gudahood ah.
- (4) Marka Magdhow la siinayo macmiil taas oo sabab u ah Joojinta adeegga ee adeeg bixiyaha ama ka guuridda adeeg bixiyaha ama Adeeg bixiyaha loo guurayo, hadba kii ay khuseyso, waa inuu Macaamiisha xaqa u leh magdhowga si degdeg ah loo siiyaa magdhowga, iyadoo aysan ka dambayn 30 maalmood kaddib Joojinta heshiiska.
- (5) Adeeg bixiyuhu ma joojin karo adeeg ilaa ay Hay'addu xaqiijiso helitaanka Istaraatiijiyadda maaraynta macaamiisha ee lagu gudbiyey faqrada 12(1)(a), ama Hay'adda dib u eegtay qorshaha istaraatiijiyadda horay loo soo gudbiyay.

Qodobka 13^{aad}

Ilaalinta Xogta Shakhsiga ah ee Adeegyada Isgaarsiinta

- (1) Adeeg bixiyuhu ma isticmaali karo macluumaadka shakhsiga ah ee Macmiilka iyada oo aanu jirin oggolaanshaha Macmiilka, marka laga reebo xaaladda isticmaalka uu oggol yahay Sharciga Dhowrista Xogta ee 2023 ama Shuruucda kale ee khuseeya.
- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuu marka uu helayo oggolaanshaha ku xusan faqrada (1) xaqiijiya in:
 - (a) Macmiilku leeyahay awoodda uu ku bixin karo oggolaanshaha;
 - (b) Macmiilku si ikhtiyaari ah u bixiyo oggolaanshaha; iyo
 - (c) Oggolaanshuhu gaar u yahay Ujeeddada isticmaalka xogta.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka si cad, si fudud loo fahmi karo oo sax ah ugu siiyaa siyaasadda asturnaanta xogta, taas oo ay tahay inay ku jirto macluumaadka soo socda:
 - (a) Sharraxaad dhammaystiran oo ku saabsan habraacyada macluumaadka online-ka ah iyo habraacyada macluumaadka aan online-ka ahayn ee Adeeg bixiyaha, oo ay ku jiraan arrimaha soo socda:
 - (i) aqoonsiga qaybaha macluumaadka shakhsiga ah ee uu Adeeg bixiyuhu ka ururiyey Macaamiisha 12-kii bilood ee la soo dhaafay;
 - (ii) aqoonsiga qaybaha ilaha laga soo ururiyo Macluumaadka shakhsiga ah;
 - (iii) aqoonsiga adeegga gaarka ah ama Ujeeddada ganacsi ee macluumaadka shakhsiga ah looga ururinayo macaamiisha;
 - (iv) aqoonsiga qaybaha Macluumaadka shakhsiga ah, haddii ay jiraan, ee uu Adeeg bixiyuhu la wadaagay dhinacyada saddexaad 12-kii bilood ee la soo dhaafay, iyo Dhinacyada saddexaad ee lala wadaagay macluumaadka;
 - (v) aqoonsiga adeegga gaarka ah ama ujeeddada loo Wadaagayo Macluumaadka shakhsiga ah ee Macaamiisha;
 - (vi) caddeyn ku saabsan in adeeg bixiyuhu si dhab ah u ogyahay inuu bixiyo macluumaadka shakhsiga ah ee Carruurta; iyo
 - (vii) Caddayn ku saabsan in adeeg bixiyuhu isticmaalo ama shaaciyo macluumaadka shakhsiga ah ee xasaasiga ah.
- (4) Adeeg bixiyuhu waa inuu ururiyaa keliya uuna isticmaalaa macluumaadka shakhsiga ah ee macmiilka ee khuseeya adeegga la bixiyo.
- (5) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macluumaadka shakhsiga ah kaydiyaa oo keliya muddo macquul ah oo loogu baahan yahay kaliya ujeeddada loo ururiyey macluumaadka shakhsiga ah.

- (6) Adeeg bixiyuhu waa inuusan farriimo suuq geyn ah ugu dirin macmiilka, haddii aanu Adeeg bixiyuhu sheegin sida uu macmiilku u diri karo codsi uu ku xaddidayo fariimahaas isaga oo aan wax kharash ah bixin.
- (7) Adeeg bixiyuhu waa inuu dejiyo Tallaabooyin farsamo iyo kuwo maamul oo lagu ilaalinayo Sugnaanta iyo dhammaystirnaanta xogta Macmiilka inta lagu jiro marxaladaha adeegga.
- (8) Adeeg bixiyuhu waa inuu Hay'adda iyo Macaamiisha ay saamaysay ku wargeliyaa xadgudub kasta oo amniga xogta shakhsiga ah, si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta (2023), Iyadoo aan la daahineynin.

Qodobka 14^{aad} **Maaraynta Cabashooyinka**

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu:
 - (a) dejiyaa Habraaca maaraynta cabashooyinka oo ay ku jiraan shuruudaha ugu yar ee maaraynta cabashooyinka Macaamiisha; iyo
 - (b) fuliyaa Habraaca maaraynta cabashooyinka ee buuxinaya shuruudaha ugu yar ee maaraynta cabashooyinka Macaamiisha.
- (2) Shuruudaha ugu yar ee ku xusan faqrada 14(1) waa inay ka mid yihiin:
 - (a) Helitaan fudud;
 - (b) Isla-xisaabtan;
 - (c) Karti-xirfadeed;
 - (d) Sir-ilaalin;
 - (e) Sinnaan;
 - (f) Eex-la'aan;
 - (g) waafaqsanaanta Sharciga;
 - (h) Amni; iyo
 - (i) Daahfurnaan.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu dejiyo oo fuliyo Habraaca Cabashooyinka Macaamiisha kaas oo ah mid:
 - (a) kooban oo si fudud loo fahmi karo;
 - (b) xambaarsan macluumaad khuseeya sida loo maareeyo cabashooyinka macaamiisha iyo sida Cabasho-gudbiyeyaashu gudaha iyo dibaddaba ugu gudbin karaan

Cabashooyinkooda aan la xallin, oo ay ku jirto Barta online-ka ah ee Cabashooyinka Macaamiisha ee Hay'adda;

(c) ugu dambeeyay (up to date) iyo

(d) si wanaagsan loo shaaciyey oo si fudud loo heli karo.

(4) Marka Adeeg bixiyuhu isticmaalo lambar taleefoon oo loogu talagalay weydiimaha guud, kaas oo Macaamilka u saamaxaya inuu doorto ikhtiyaarrada caawimaada, ikhtiyaarrada loo soo bandhigo Macaamilka waa inay ku jiraan Ikhtiyaar si cad loo soo bandhigay oo uu si toos ah ula hadli karo xubin ka tirsan shaqaalaha Adeeg bixiyaha ee qaabilsan Cabashooyinka.

(5) Adeeg bixiyaha isticmaala Tignoolajiyada iskeed go'aan u qaadata, waa inuu Macaamiisha ogeysiiyaa ka hor isticmaalka.

(6) Macaamiisha waa in lagu wargeliyaa isticmaalka Adeeg bixiyaha ee Tignoolajiyada iskeed go'aan u qaadata iyo xaq Macmiilka u leeyahay inuu adeegsado ama ka baxo tignoolajiyadaas.

(7) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan shaqaalaha qaabilsan Cabashooyinka:

(a) si buuxda loogu wargeliyey oo ay fahmeen Habraaca Cabashooyinka Macaamiisha; iyo

(b) ogaadaan halka iyo sida loo heli karo Habraaca Cabashooyinka Macaamiisha.

(8) Adeeg bixiyuhu waa inuu Cabashooyinka si degdeg ah u xalliyaa, isagoo ku salaynaya Heer kasta oo Tayada Adeegga ah oo ay Hay'addu qeexday iyo Heshiiska Heerka Adeegga ee khuseeya adeegga isgaarsiinta ee Cabashada laga qabo; ama 21 maalmood gudahood marka la helo Cabashada; ama muddada ay hay'addu oggolaato.

Qodobka 15^{aad}

Heerarka Adeegga Macaamiisha iyo Xarunta Wicitaannada

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macaamiisha u oggolaadaa inay sameeyaan Weydiimo ama Cabashooyin:

(a) taleefoon ahaan, iyagoo la hadlaya xubin ka tirsan shaqaalaha Adeeg bixiyaha ee qaabilsan Cabashooyinka;

(b) warqad ahaan; iyo

- (c) iimayl, online iyo hab kasta oo kale oo elektaroonig ah, oo ay ku jiraan barnaamij ama Adeegga wada-hadalka tooska ah, haddii Adeeg bixiyuhu isticmaalo habkaas kale.
- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuu qeexaa faahfaahinta ay macaamiisha ku jira xaalad nuglaansho u adeegsan karaan inay kula xiriiraan habka ku habboon ee ka taageeraya weydiimaha ama Cabashooyinka.
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu hubiyaa in Weydiimaha iyo Cabashooyinka Macaamiisha looga jawaabo waqtigooda, waana inuu fuliyo Heerarka adeegga macaamiisha si:
- (a) loo yareeyo muddada sugitaanka, Wareejinta wicitaannada iyo in Macaamiishu la macaamilaan dad badan si wax looga qabto Weydiimaha ama loo xalliyo Cabashooyinka; iyo
- (b) la aqoonsado lana daabaco waqtiyada khuseeya qaybaha kala duwan ee adeegga iyo tallaabo kasta oo ka mid ah habraaca maaraynta cabashooyinka ee Qodobka 14aad,
- (4) Adeeg bixiyuhu waa inuu:
- (a) Dadaal ku bixiyaa inuu wax ka qabto weydiimaha ama ku xalliyo cabashada xiriirka ugu horreeya; haddii taasi suurtagal noqon weydana, sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah ugu xaliyaha xiriirada dambe ee macmiil lala yeelaanaayo.
- (b) sameeyaa dhammaan dadaallada macquulka ah si uu Weydiimaha wax uga qabto ama Cabashooyinka ugu xalliyo habka sida ugu wanaagsan ugu habboon baahiyaha Macmiilka;
- (c) fuliyaa habraacyo lagu aqoonsanayo, lagu maaraynayo ama laguna xallinayo Weydiimaha ama Cabashooyinka degdegga ah;
- (d) sameeyaa Baaritaanka cabashada ilaa xad u dhigma culayska Cabashada, marka aanay suurtagal ahayn in Cabashada lagu xalliyo si uu Macmiilku ugu qanacsan yahay Xiriirka ugu horreeya ama Baaritaan la'aan;
- (e) xaqiijiyaa in shaqaalihiiisu fahmaan Tallaabooyinka sixitaanka ee la heli karo si ay uga caawiyaan Xallinta cabashada;
- (f) Tallaabo sixitaan kasta oo loo soo bandhigo Macmiilka u xalliyyaa, inta suurtagalka ah, si tallaabada sixitaanku wax uga qabato sababta ugu weyn ee Cabashada iyo duruufaha gaarka ah ee macmiilka;
- (g) Cabashooyinka la xiriira khaladaadka biilka ku xalliyyaa ugu dambayn dhammaadka Muddada biilka ee isla markiiba ku xigta Muddada biilka lagu jiro, , ama 30 maalmood gudahood, hadba kii soo horreeya; iyo

- (h) bixiyaa xaqiijinta xalka la soo jeediyey ee Cabashada 10 Maalmo shaqo ah gudahood marka la helo cabashada; ama marka ay jirto go'itaanka adeegga, muddo macquul ah gudaheed oo ku salaysan adeegga la bixiyey iyo Halbeegyada Tayada Adeegga ee ay Hay'addu qeexday ee lagu dabaqayo xallinta go'itaannada la midka ah.
- (5) Waqtiyada ku xusan qodobkan waxaa lagu dabaqayaa muddada xallinta cabashooyinka ee Qodobka 14(8);
- (6) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macmiilka ku wargeliyaa dib-u-dhac kasta oo ku yimaadda waqtiyada la soo jeediyey ee maaraynta Cabashadiisa, sida ugu dhakhsaha badan marka uu ogaado dib-u-dhaca.
- (7) Marka Adeeg bixiyuhu, isagoo gudanaya waajibaadkiisa, awoodi waayo inuu la xiriir Macmiil si uu ugala hadlo cabashadiisa ama ugu wargeliyo xalka la soo jeediyey, ugu yaraan 5 isku-day oo kala duwan, isku-day kastaana dhacay maalin taariikheed oo gaar ah, muddo oo aan ka badnayn 14 maalmood, Adeeg bixiyuhu waa inuu qoraal ugu diraa Macmiilka isagoo:
- (a) Macmiilka ku wargelinaya in aan lala soo xiriiri waayay;
 - (b) bixinaya faahfaahinta isku-daygii xiriirka ee la sameeyay; iyo
 - (c) u diraya casuumaad uu Adeeg bixiyaha kula soo xiriirayo si cabashada looga wada hadlo, umddo cayiman oo aan ka yarayn 14 Maalmood oo shaqo laga bilaabo taariikhda casuumaaddaas.
- (8) Adeeg bixiyaha maamula Xarunta wicitaannada waa inuusan:
- (a) Macaamiisha kula xiriirin Wicitaanno aan bani'aadam ku jirin (robocalls), Lambar-garaacid otomaatiig ah(auto-dailling) ama Barnaamijyo garaad macmal ku saleysan (chatbots) isaga oo aan haysan oggolaansho cad oo macaamilka ah;
 - (b) samayn Wicitaan xayaysiin taleefan (telemarketing) ka hor 9:00 subaxnimo ama kaddib 5:00 galabnimo;
 - (c) isticmaalka Macluumaadka shakhsiga ah ee Macaamiisha ujeeddo kasta ha lahaato, oo ay ku jiraan Suuqgeynta taleefanka, Adeegga macaamiisha ama Ururinta daymaha, isaga oo aan haysan oggolaanshaha Qofka xogtu khusayso; iyo
 - (d) ururin ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ah ee la xiriira carruurta, haddii aanay waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah ee carruurta oggolaansho ka bixin, isla markaana aan laga talagelin ujeeddooyin cayiman, cad oo sharci ah.

- (9) Adeeg bixiyuhu waa inuu fuliyo Siyaasado gudaha ah iyo Nidaamyada xakamaynta gudaha (internal policies and controls) si loo xaqiijiyo U-hoggaansanaanta shuruudaha Xarunta wicitaannada.

Qodobka 16^{aad}
Go'idda Adeegga iyo Shabakadda

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu Macaamiishiisa ku wargeliyaa Go'itaanka shabakadda isla marka uu ogaado Go'itaankaas.
- (2) Marka Adeeg bixiyuhu helo Warbixinta go'itaanka adeegga, waa inuu go'aamiyaa:
- (a) inay jirto sabab keeni karta inuu socdo Go'itaanka shabakadda; iyo
 - (b) Macmiilka/macaamiisha saameeyey ama ay u badan tahay inuu saameeyo Go'itaanka shabakaddaas; ama
 - (c) Haddii aanay sidaas ahayn, ama haddii Warbixinta go'itaanka adeeggu la xiriirto Go'itaanka shabakadda uu yahay mid ka dhashay musiibo dabiici ah (natural disasters), iyo in warbixinta loo maareeyo habraaca maaraynta cabashooyinka
- (3) Adeeg bixiyuhu waa inuu qaadaa dhammaan tallaabooyinka macquulka ah si uu u sameeyo go'aaminta ku xusan faqrada (2), uu na xaqiijiya sababaha go'itaanka shabakadda marka ugu horeysa uu macmiilka la xiriiro.
- (4) Haddii Adeeg bixiyuhu go'aamiyo inay jirto sabab keeneyso in go'itaanka shabakad ay dhacdo, isla markaana uu macmiilka/macaamiisha saameeyay sida lagu go'aamiyay faqradda 16(2), adeeg bixiyaha waa in warbixinta ka dhigaa in ay tahay warbixin shabakad go'itaan (network outage report), marka laga reebo in go'itaanka uu ku yimid sababo la xiriira musiibo dabiici ah waana inuu isla markiiba wargeliyaa dhammaan Macaamiisha saameysan.
- (5) Adeeg bixiyuhu waa inuu, sida ugu dhakhsaha badan ee macquul ahaan suurtagalka ah, dhammaystiraa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee awooddiisa ku jira si loo fuliyo xalka caadiga ah ee loo dejiyey ee Go'itaanka shabakadda.
- (6) Adeeg bixiyuhu waa inuu sameeyaa dhammaan dadaallada macquulka ah si uu macmiilka qaba Cabasho degdeg ah oo la xiriirto Go'itaanka shabakadda uga caawiyo inuu ku xirnaado adeeg inta Go'itaanka shabakaddu socdo, oo ay ku jirto tixgelinta Xal kale ama Xal ku-meelgaar ah marka la heli karo.

- (7) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in maamule sare uu mas'uul ka yahay dhaqangelinta Habraaca shirkadda ee maaraynta Cabashooyinka, gaar ahaan kuwa la xiriira Go'itaanka shabakadda.
- (8) Adeeg bixiyuhu waa inuu, 30 maalmood gudahood marka ay dhacdo in la fulin waayo heerarka tayada adeegga; uu magdhaw ka siiyaa macmiilka arimaha soo socda :
- (a) Hagaajin dib-u-dhacday oo ku saabsan Waayidda adeegga oo socotay in ka badan 3 Maalmood oo shaqo;
 - (b) Waayid adeeg oo soo noqnoqota, marka Waayid kale oo adeeg dhacdo toddobaad gudihiis kaddib Hagaajintii hore;
 - (c) Dib u dhac ku yimid adeeg bixin ama bilowga adeegga;
 - (d) Ballan aan la fulin, marka laga reebo haddii Adeeg bixiyuhu dib u qorsheeyey Ballanta isagoo Macaamilka siiyey Ogeysiis ugu yaraan 48 saacadood ah ama helay oggolaansho cad oo Macaamilka ah.
- (9) Adeeg bixiyuhu waa inuu dejiyaa hannaanno, habraacyo iyo nidaamyo uu ku kormeero kuna falanqeeyo diiwaannadiisa Cabashooyinka, si uu u aqoonsado dhibaatooyinka soo noqnoqda, uga hortago dhibaatooyinkaas iyo arrimaha la xiriira, uguna hortago in cabashooyinka la xiriira ay soo noqdaan.

Qodobka 17^{aad}

Xeerarka Hab-dhaqanka (Codes of Practice)

- (1) Dhammaan Adeeg bixiyeyaashu waa inay, 6 bilood gudahood laga bilaabo Daabacaadda Xeer-nidaamiyayaashan ama saddex bilood gudahood marka Rukhsad la siiyo, qoraal ahaan Hay'adda ugu gudbiyaan Xeer-hawleedkooda Ilaalinta Macaamiisha (code of practice).
- (2) Hay'addu waa inay, 3 bilood gudahood marka ay hesho Xeer-hawleedka lagu gudbiyey faqrada 17(1), qaaddaa mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:
- (a) ansixisaa Xeer-hawleedka la soo jeediyey sida loo soo gudbiyey;
 - (b) ansixisaa Xeer-hawleedka iyadoo go'aaminaysa in Rukhsadluhu sameeyo wax-ka-beddellada ay Hay'addu cayintay; ama
 - (c) diiddaa ansixinta Xeer-hawleedka la soo jeediyey, iyadoo sababaha caddeynaysa.

QEYBTA III—QODOBBADA GUUD

Qodobka 18^{aad}

Kormeerka

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu sameeyaa qiimayn gudaha ah, kormeer iyo dib-u-eegis ku saabsan U-hoggaansanaantiisa Xeernidaamiyahan;
- (2) Hay'addu waa inay:
 - (a) Kormeertaa U-hoggaansanaanta qeybta isgaarsiinta ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Xeer-nidaamiyayaashan iyo shuruudaha Rukhsad kasta;
 - (b) samaysaa Sahanka qanaacsanaanta macaamiisha, natijoooyinkiisana daabacdaa ugu yaraan hal mar saddexdii sanaba.

Qodobka 19^{aad}

U-hoggaansanaan

- (1) Adeeg bixiyuhu waa inuu dejiyo tallaabooyinka, hannaanada ama nidaamyada lagama maarmaanka u ah U-hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyayaashan saddex bilood gudahood marka uu dhaqangalo.
- (2) Adeeg bixiyuhu waa inuu Warbixinta u-hoggaansanaanta ee ku xusan faqrada 19(1) Hay'adda u gudbiyaa 30 maalmood gudahood marka ay dhammaato Muddada u-hoggaansanaanta.

Qodobka 20^{aad}

Soo Gudbinta Warbixinta

Dhammaan Adeeg bixiyeyaashu waa inay sannad kasta Hay'adda u gudbiyaan warbixinta U-hoggaansanaantooda Xeernidaamiyaha

Qodobka 21^{aad}

Ganaaxyada

- (1) Adeeg-bixiye jebiya ama u xadguduba qodob kasta oo ka mid ah Xeernidaamiyahan, Hay'addu waxay ku soo rogi kartaa ganaax maamul oo aan ka badnayn labaatan kun oo Doollarka Mareykanka ah (USD 20,000) ku xadgudub kasta.
- (2) Marka jebintu ay sii socoto kaddib markay Hay'addu Adeeg-bixiyaha u ogeysiiso ganaaxa, Adeeg-bixiyuhu wuxuu mutaysanayaa ganaax maamul oo dheeraad ah oo aan ka

badnayn labaatan kun oo Doollarka Mareykanka ah (USD 20,000) maalin kasta oo ay jebintu sii socoto.

Qodobka 22^{aad}

Dhaqan-galka

Xeer-nidaamiyayaashan waxay dhaqan-gelayaa marka lagu daabaco barta internetka ee Hay'adda.

Qabyo-qoraal